

— 101 —

Sharci lambar 7, taariikh 2 Feb. 1986: Dib u habeynta
Mihnadda Notaayada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggcaanshaha Golaha
Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Mihnadda Notaayada waxaa lagu dhaqayaa Sharci-
ga lambar 8 ee 15.2.1961 iyo Xeerka-tashriiciga lambar
1 ee 2.3.1962.

Qod. 2aad

Iyagoo Sharciyada kor ku tilmaaman ay sidooda u
taagnaanayaan, Madaxweynaha JDS, dhegeysiga soo-
jeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta kad-
dib, wuxuu Notaayo u magacaabi karaa, imtixaan la'-
aan, qof xagga aqoonta gaarka ah ee mihnadda Notaa-
yenimada, khibradda iyo waayo arganimada uu leeya-
hay dartood loo gartay inuu mudan yahay xilkaas in
uu qabto.

Qod. 3aad

1. Sharciyaqaannada ka tirsan Wasaaradda Gar-
soorka iyo Arrimaha Diinta ee dhaqangalka Sharcigan
ka hor hayey xil Notaayo, waxaa u furen in ay shaqada
notaayenimada sii wataan iyagoo tan Dawladda istiqaa-
lo ka keenaya ana ay ku laabtaan Wasaaraddooda

2. Kala doorashada labada fursadood waa in ay
ku dhacdaa muddo lixdan maalmood gudahood ah, laga
billaabo maalinta Sharcigani uu dhaqan galo.

Qod. 4aad

Khidmadda Notaayuhu uu ku yeelanayo hawlaha
uu qabto waxaa lagu xaddidayaa Xeer Madaxweyne,
iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka
iyo Arrimaha Diinta.

— 102 —

Qod. 5aad

Waxaa la baabi'iyey Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la secon Karin Sharcigan.

Qod. 6aad

Sharciganj wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)